

Waxaa sii socda macluumaad dheeraad oo ku saabsan wakaalad kasta

Guddiga Anshax xumada iyo Dambigu waxay aqbalaan cabashooyin ku saabsan anshax xumada saraakiisha dawlada ee wasaaradaha dawlada gobolka iyo wakaaladaha, dawlada hoose, Adeega Boliiska Queensland iyo xubnaha Baarlamaanka Dawlada Gobolka. Markaad cabasho soo gudbineyso, hubi:

- Inay la xiriirto waxqabad noqon kara gaf dambi ah ama wax khatarteedu gaarsiisan tahay ceyrinta sarkaalka ay khuseyso
- Bixi macluumaadka ugu badan ee bixin karto iyo wixii dukumiinti ah ee suurto gal ah.

Xaq sooraha (Ombudsman) Queensland wuxuu wax ka qabtaa cabashooyinka ku saabsan go'amada wakaaladaha dawlada . Xafiisku:

- Wuxuu caawiyaa dadka inay xaliyaan waxyaalaha ay saluugayaan ama cabashooyinka ku saabsan go'amada ama falalka wasaaradaha dawlada gobolka, wakaaladaha ama dawlada hoose
- Wuxuu wax ka qabtaa cabashooyinka ay ku helaan taleefan, ma qofka laftiisa, warqad, fakis ama iimeyl.
- Wuxuu caawiyaa wakaaladuhu inay hagaajiyaan tayada maamulkooda iyo go'aan gaaridooda.

Helitaanka Isticmaalka Adeega Turjumaada Afka iyo Qoraalka

Wakaalad kastaa waxay bixisaa isticmaalka Adeega Turjumaada Afka iyo Qoraalka (TIS) haddii aad u baahan tahay in lagaa caawiyo turjumaad Adeegan ayaa laga helayaa 131 450.

Ciddii aad kala xiriiri lahayd inay kaa caawiso cabashadaada

Guddiga Ka soo horjeeda Midab kala soocaa Queensland (Anti-Discrimination Commission Queensland)

Ph: 1300 130 670
TTY: 1300 130 680
Fax: 07 3247 0960
Post: PO Box 2122, Milton Q 4064
Website: www.adcq.qld.gov.au

Guddiga Dhalinyarada, Carruurta iyo masuulka ilmaha (Commission for Children and Young People and child guardian)

Ph: 07 3247 5525
Freecall: 1800 688 275
Fax: 07 3247 5507
Post: PO Box 12671, Brisbane George St Q 4003
Website: www.ccypcg.qld.gov.au

Guddiga Anshax xumada iyo Dambiga (Crime and Misconduct Commission)

Ph: 07 3360 6060
Freecall: 1800 061 611
Fax: 07 3360 6333
Post: GPO Box 3123, Brisbane Q 4001
Website: www.cmc.qld.gov.au

Guddiga Xuquuqda Caafimaadka (Health Rights Commission)

Ph: 07 3234 0272
Freecall: 1800 077 308
TTY: 07 3225 2559
Fax: 07 3234 0333
Post: GPO Box 3089, Brisbane Q 4001
Website: www.hrc.qld.gov.au

Xaq sooraha Queensland (Queensland Ombudsman)

Ph: 07 3005 7000
Freecall: 1800 068 908
Fax: 07 3005 7067
Post: GPO Box 3314, Brisbane Qld 4001
Website: www.ombudsman.qld.gov.au

Waxaa lagu turjumay taageeradii aan ka helnay Golaha Magaalada Brisbane (translated with the support of Brisbane City Council)

Waa OK inaad cabataa

Xuquuqdaada ayaan daneynaynaa

Waa bilow wada jir ay usoo saareen xaq sooraha iyo Guddiga Queensland

Xuquuqdaada

waa wax hagaagsan inaad cabato markaadan ku faraxsaneyn adeeg ama aad rumeysan tahay in laguula dhaqmay si aan caddaalad ahayn. Cabashadaada ayaa isbedel keeni karta.

Haddii aad dhibaato ku qabto adeeg, waad noo sheegi kartaa ka dibna waxaan isku dayeynaa inaan ku caawino. Wakaalad kastaa waxay wax ka qabataa cabashooyin ka duwan kuwa kale.

Adeegyadayadu waa bilaash, madax bannaan oo laga helayo Queensland oo dhan.

Dhibaato ayaan qabaa - yaan u cawdaa?

Macaamil aan caddaalad aheyn iin awgeed, jinsi, jinsiyad, diin, iwm.?

Wac Guddiga Ka soo horjeeda Midab kala sooca

18 ma ka yar tahay dhibaataana ma kaa haysataa adeeg?

Wac Guddiga Dhalinyarada iyo Carruurta

Ma ka shakisan tahay musuqmaasuq, laaluush ama anshax xumo sarkaal oo la xiriirta sarkaal boliis ama sarkaal dawladeed?

Wac Guddiga Anshax xumada iyo Dambiga

Dhibaato ma ku qabtaa adeeg caawifaad?

Wac Guddiga Xuquuqda Caafimaadka

Haddii aadan ku faraxsaneyn go'aanka ama falka wakaalad dawladeed, wasaarad ama dawlada hoose?

Wac Xaq sooraha Queensland

Wakaalad kastaa waxay ku faraxsan tahay inay wax ka qabato cabashadaada.

Sida Cabashooyinka wax looga qabto

Wakaald kastaa waxay iskudayaysaa inay sida ugu sahlan ee suurta galka ah cabashadaada wax uga qabato.. Wakaalad kastaa waxay raacdaa hab isku mid ah markay baareyso cabashooyinka.



Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan wakaalad kasta

Guddiga midab kala soocidu wuxuu wax ka qabtaa midab kala sooca, kadeedka galmada iyo falalka naceybka dadweynaha. midab kala soocu wuxuu noqon karaa sharci darro haddii u dhaco dartii:

- jinsiyad
- da'
- uur
- naas nuujin
- xiriirka guur
- jinsi
- diin
- urur mihnadeed
- iin
- galmo
- waajibaadka qoyska
- wallaalidnimo
- aqoonsiga jinsi
- siyaasada aad rumeysan tahay
- galmo sharci ah.

Guddiga Carruurta iyo Dhalinyarada ee u dooda xuquuqda, danaha iyo wanaaga carruurta iyo dhalinyaradu. Waxay:

- helaan oo baaraan cabashooyin
- maamulaan Barnaamijka Booqashada Bulshada ee Gobolka oo dhan
- la socdaan korna u qaadaan korna u qaadaan shuruucda , siyaasadaha iyo waxqabadyada.
- Waxay u shaandheynayaan dadka dabaqado kala duwan oo ah shaqooyin la xiriira carruurta
- Daraasad ku sameynayaan arimaha saameynaya carruurta
- dib u eegeyaan oo haynayaan dinwaanka dhimashada carruurta xiriirka la yeelatay Wasaarada ammaanka carruurta.

Guddiga Xuquuqda Caafimaadka wuxuu ka shaqeeyaa waxyaalaha la saluugsan yahay iyo cabashooyinka ku saabsan daryeelka caafimaadka ama daaweynta Queensland . Cabashooyinka :

- waa in nalala soo qaadaa 12 bilood gudahood ka dib marka la ogaado dhibaataada.
- waxaa laga sameyn karaa nooc kasta oo ka mid ah daryeelka , tusaale, daaweynta, wiisatada, wadhadalka ama isticmaalka
- waxaa laga caban karaa adeegyada caafimaadka ee gaarka ah ama kuwa dawlada.